ALLINA
Hospitals & Clinics

Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka

Aniga oo ah _____ waxan garanayaa in warqadani ii ogalaanayso (masuuliyad wareejiyaha)

inaan sameeyo MID ama LABADAN soo socda:

1. Inaan qof kale u magacaabo inu noqdo wakiilkayga daryeelka caafimaadka kaasoo ii gaadhi doona go'aanada daryeelka caafimaadka haddii aanay suurogal ii ahayn inaan anigu go'aan gaadho ama naftayda u hadlo. Wakiilkayga caafimaadku waxa uu ii gaadhaa go'aanada daryeelka caafimaadka iyagoo ku salaysan fariimaha aan ku bixiyay Qaybta II ee warqadan, haddii ay jiraan, ama rabitaanka aan isaga ama iyada u sheegay, ama waa inu sameeyaa wixii dantayda u roon haddii aanan u sheegin rabitaankayga daryeelka caafimaadka.

IYO/AMA

2. Inaan bixiyo fariimo ku saabsan daryeelka caafimaadka si tilmaan loo siiyo dadka kale ee aniga ii gaadhaya go'aanada daryeelka caafimaadka. Haddii aan magacaabay wakiil daryeel caafimaad, fariimahan waxa isticmaali doona wakiilka. Waxa kale oo fariimahan isticmaali doona bixiyayaashayda dareelka caafimaadka, dadka kale ee gargaar ka geysanaya daryeelka caafimaadkayga, iyo qoyskayga, haddii ay dhacdo inaanay suurogal ii ahayn inaan naftayda go'aan u gaadho.

QAYBTA I: MAGACAABISTA WAKIIL DARYEEL CAAFIMAAD

QOFKANI WAA QOFKA AAN DOONAYO INU II GAADHO GO'AANADA DARYEELKA CAAFIMAADKA HADDII AANAN AWOODIN INAAN NAFTAYDA GO'AAN U GAADHO AMA AAN NAFTAYDA U HADLI KARIN. Waan ogahay inaan wakhti kasta badali karo wakiilkayga ama wakiilka labaad, waxa kale oo aan ogahay inaanay qasab igu hayn in aan magacaabo wakiil ama wakiil labaad.

(Haddii aad magacaabtid wakiil, waa inaad kala hadashid dardaarankan daryeelka caafimaadka wakiilkaaga siisidna koobi ama nuqul ah dardaaranka. Haddii aanad doonaynin inaad magacaabtid wakiil, waxa aad Qaybta I ka tagi kartaa iyadoo banaan waxana aad u gudbi kartaa Qaybta II.)

Marka aanan awoodin inaan naftayda go'aan u gaadho ama u hadlo, waxa aan ku kalsoonahay una magacaabay_____ inu ii gaadho go'aanada daryeelka caafimaadka. Qofkani waa wakiilkayga daryeelka caafimaadka.

Waxa annu isu nahay aniga iyo wakiilkayga daryeelka caafimaadku:

_____.

Lambarka tilifoonka ee wakiilkayga daryeelka caafimaadka:

Adreeska/magaalada/gobolka wakiilkayga daryeelka caafimaadka: _____

_____

_____.

(IKHTIYAAR) MAGACAABISTA WAKIILKA LABAAD EE DARYEELKA CAAFIMAADKA: haddii wakiilkayga daryeelka caafimaadka aan la heli karin, waxan ku kalsoonahay magaacabayna _____
inu noqdo wakiilkayga labaad ee daryeelka caafimaadka.

Waxa aanu isu nahay wakiilkayga labaad ee daryeelka caafimaadka:

Lambarka Tilifoonka ee wakiilkayga labaad ee daryeelka caafimaadka:

Adreeska/magaalada/gobolka wakiilkayga labaad ee daryeelka caafimaadka:

_____

_____

_____.

KANI WAA WAXA AAN DOONAYO IN WAKIILKAYGA DARYEELKA CAAFIMAADKU AWOOD U YEESHO INU QABTO HADDII AANAN AWOODIN INAAN GO'AAN GAADHO AMA NAFTAYDA U HADLO (Waan ogahay inaan go'aanadan badali karo.)

Wakiilkayga daryeelka caafimaadka waxa si toos ah loo siiyay awoodda hoos ku qoran A ilaa D. Waa in wakiilkayga daryeelka caafimaadku raaco fariimahayga daryeelka caafimaadka ee ku qoran warqadan ama fariimaha kale ee aan siiyay wakiilkayga. Haddii aanan bixinin fariimo daryeel caafimaad, markaa waa in wakiilkaygu ku dhaqmaa wixii dantayda u wanaagsan.

Marka kasta oo aanan awoodin inaan go'aan gaadho ama aan naftayda u hadlo, wakiilkayga dareeylka caafimaadku waxa uu awood u leeyahay:

A. Inu ii gaadho go’aano daryeel caafimaad kasta. Taa waxa ku jira awoodda inu bixiyo, diido ama ogalaashaha kala noqdo daryeel, daweyn, adeeg ama hab kasta. Waxa tan ku jira go’aan ka gaadhista in la joojiyo ama aan la bilaabin daryeel naftaydu ku nooshahay ama keenaya in naftu igu sii jirto, iyo go’aan ka gaadhista daweyn dhaakhilis badan xagga caafimaadka maskaxda.

B. Inu doorto dhakhtarkayga/bixiyaha daryeelka caafimaadkayga.

C. Inu doorto meesha aan ku noolaanayo iyo meesha daryeel iyo gargaar la igu siiyanayo marka go’aanadaasi la xidhiidhaan baahida daryeelka caafimaadkayga.

D. Inu dib u eego faylashayda caafimaadka yeeshana isla xuquuqda aan yeelan lahaa markay noqoto siinta faylashayda caafimaadka dad kale.

Haddii AANAN DOONAYNIN in wakiilkayga daryeelka caafimaadku yeesho mid ka mid ah awoodaha ku qoran A ilaa D — ama haddii aan doonayo inaan XAD u yeelo awood kasta oo ku taalla A ilaa D, WAA INAAN taa halkan ku sheegaa:

_____

_____

_____

_____.

Wakiilkayga daryeelka caafimaadka si toos ah LOOMA siin awoodda ku qoran (1) iyo (2) halkan hoose. Haddii aan DOONAYO in wakiilkaygu yeesho mid ka mid ah awoodaha (1) iyo (2), waa inaan magacayba oo kooban (XURUUFTA UGU HORAYSA) ku qoraa barta sadarka awoodda ka horaysa, ka dibna wakiilkaygu waxa uu YEELAN DOONAA awooddaa.

_____ (1) Inu go'aan ka gaadho in la bixiyo xubnaha jidhkayga iyo in kale marka aan dhinto.

_____ (2) Inu go'aan ka gaadho waxa jidhkayga lagu samaynayo haddii aan dhinto (aasid, gubis).

Haddii aan doonayo in wax dheeraad ah aan ka sheego awoodda wakiilka daryeelka caafimaadkayga ama aan doonayo inaan xad u yeelo awoodaha, halkan ayaan ku sheegi karaa:

_____

_____.

QAYBTA II: FARIIMAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Buuxo Qaybta II haddii aad doonaysid inaad bixisid fariimo daryeel caafimaad. Haddii Qaybta I aad ku magacawday wakiil, buuxinta Qaybta II waa ikhtiyaar, laakiin waxay aad wax u tari kartaa wakiilkaaga. Laakiin, haddii aanad ku dooran wax wakiil ah Qaybta I, WAA inaad buusid qayb ama dhamaan Qaybta II haddii aad doonaysid inaad samaysid dardaaran daryeel caafimaad.

Kuwani waa fariimaha daryeelka caafimaadkayga marka aanan awoodin inaan go'aan gaadho ama naftayda u hadlo. Fariimahan waa in la raacaa in alaale inta ay ku saabsan yihiin baahidayda.

KUWANI WAA WAXA AAN AAMINSANAHAY IYO WAXAN QIIMEEYO MARKAY TAHAY DARYEELKA CAAFIMAADKAYGA. Waan ogahay inaan badali karo go'aanadan ama aan banaan kaga tagi karo mid kasta oo ka mid ah.

Waxa aan doonayaa inaad ogaatid waxyaaban aniga igu saabsan si aad go'aan uga gaadhid daryeelka caafimaadkayga.

Hadafka daryeelka caafimaadkaygu waa: _____

_____

_____.

Cabsidayda ku saabsan daryeelka caafimaadkaygu waa: _____

_____

_____.

Caqiidayda diinta iyo dhaqankaygu waa: _____

_____

_____.

Aaminsanaantayda ku saabsan marka nolosha aanay qiimo dambe ila sii lahayn waa:

_____

_____

_____.

Fikradahayga ku saabsan xaaladda caafimaadkayga ee saamayn karta qoyskayga waa:

_____

_____

_____.

Hoos waxa ku qoran dhawr xaaladood oo aan la kulmi karo. Waan garanayaa inaan kuwani aanay si sax ah u sii saadaalin karin waxa laga yaabo inu dhaco, laakiin waxan farayaa wakiilkayga iyo dhakhtarkayga ama bixiyaha daryeelkayga inay warkan u isticmaalaan intii awoodooda ah sidii ay go'aano daweyn iigu gaadhi lahaayeen haddii aanan awoodin inaan naftayda u hadlo. ***Waan fahamsanahay in LA I SIIN DOONO daweynta nafta taageerta ee haboon ANIGA OO SI KALE AMAR KU BIXIYA MOOYAANE. Qeexid:*** "Daweynta nafta taageerta" waxa macnaheedu yahay hab daweyn kasta, qalab, ama dawo inaan sii noolaado keenaysa. Kawaa waxa ku jiri kara mishiinka neefsashada, dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka (CPR), cunto macmal ama artifishal ah iyo biyo (ay ku jirto tuubo cunto ku-siin iyo faleebo), habab qalitaan, kaadi-nadiifin, dawada antibiy-ootikada cudurka lagu daweeyo, iyo/ama dhiig ku-shubis.

1. Haddii dhimashadaydu soo dhawdahay, aanayna jirin rajo caqli-gal ah oo laga qabo ladnaanta (dooro mid ka mid ah kuwan soo socda):

___ Waxan amar ku bixinayaa inaan habka dhimashayda AAN la sii dheeraynin waxna la adeegsan, sida isticmaalka dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka, neef-siinta macmalka ah ama artifishalka ah, IYO siinta nafaqada macmalka/artifishalka ah iyo waraabinta. Waan doonayaa dawada xanuun calaamadeedka iga siin doonta nafisaad iyo raaxo.

___ WAXAN DOONAYAA nafaqada macmalka ama artifishalka ah iyo waraabinta in la sii wado, iyo waliba dawooyinka xanuunka iga siin kara nafisaad iyo raaxo.

___ WAXAN DOONAYAA dhamaan daweynta nafta taageerta ee haboon caafimaad kana loogu talogalay.

WIXII FAALO DHEERAAD AH: _____

_____

_____.

2. Haddii u i hayo cudur soo-jireen ah oo sii fidiya kaasoo ugu dambeyn iyo ka baxsi la'aan keeni doono geeridayda (dooro mid ka mid ah kuwan soo socda):

____ Waxan amar ku bixinayaa inaan dhimashayda AAN la sii dheeraynin waxna la adeegsan, inkastoo aan doonayaa dawada xanuun calaamadeedka iga siin doonta nafisaad iyo raaxo.

____ WAXAN DOONAYAA nafaqada macmalka ama artifishalka ah iyo waraabinta in la sii wado, iyo waliba dawooyinka xanuun calaamadeedka iga siin karta nafisaad iyo raaxo.

____ WAXAN DOONAYAA dhamaan daweynta nafta taageerta ee haboon caafimaadkana loogu talogalay.

FAALO DHEERAAD AH: _____

_____

_____.

3. Haddii sii joogto ah aan u miyir beelo ama u suulo, geeridaydu ha dhawaato ama yaanay dhawaan (dooro mid ka mid ah kuwan soo socda):

___ Waxan amar ku bixinayaa in dhamaan taageerada nafta ee macmalka ama artifishalka ah la iga joojiyo iyo in la i siiyo dawada xanuunka biisa ee haboon.

____ Waxan codsanayaa in DAWEYN TIJAABO ah la i siiyo mudo caqli-gal ah, taasoo u go'aan ka gaadhi doono wakiilkaygu iyo dhakhaatiirtaydu. Daweyntan waxa ku jiri kara dhamaan daweynta lagama maarmaanka u ah sidii la iigu soo celin lahaa tayo nololeed oo caqli-gal ah. Haddii go'aan laga gaadho in daweynta noocaasi aanay waxtar lahayn, ka dib waxa aan doonayaa in la joojiyo dhamaan taageerada nafta ee macmalka ama artifishalka ah.

____ WAXAN DOONAYAA in nafaqada macmalka ama artifishalka ah iyo waraabinta la sii wado, ay weheliyaan dawooyinka xanuun calaamadeedka iga siin doona nafisaad iyo raaxo.

____ WAXAN DOONAYAA daweynta nafta taageerta ee haboon caafimaadkana loogu talogalay.

FAALO DHEERAAD AH: _____

_____

_____.

4. Haddii aan qabo cudur culus iyo/ama dilaa ah ama dhaawac aanayna jirin rajo caqli-gal ah inaan bogsado ayna u badan tahay in dhibaatadaasi geeri ii keeni doonto (dooro mid ka mid ah kuwan soo socda):

___ Waxan amar ku bixinayaa in dhamaan taageerada nafta ee macmalka ama artifishalka ah la iga joojiyo iyo in la i siiyo dawooyinka xanuun biiya ee haboon.

___ Waxan codsanayaa in DAWEYN TIJAABO ah la i siiyo mudo caqli-gal ah, taasoo u go'aan ka gaadhi doono wakiilkaygu iyo dhakhaatiirtaydu. Daweyntan waxa ku jiri kara dhamaan daweynta lagama maarmaanka u ah sidii la iigu soo celin lahaa tayo nololeed oo caqli-gal ah. Haddii go'aan laga gaadho in daweynta noocaasi aanay waxtar lahayn, ka dib waxa aan doonayaa in la joojiyo dhamaan taageerada nafta ee macmalka ama artifishalka ah.

___ WAXAN DOONAYAA in nafaqada macmalka ama artifishalka ah iyo waraabinta la sii wado, ay weheliyaan dawooyinka xanuun calaamadeedka iga siin doona nafisaad iyo raaxo.

___ WAXAN DOONAYAA daweynta nafta taageerta ee haboon caafimaadkana loogu talogalay.

FAALO DHEERAAD AH: _____

_____

_____.

Waxa kale oo aan doonayaa inaan kuu soo gudbiyo rabitaanadan dheeraad ah ee ku saabsan daryeelka caafimaadkayga wakhtiga soo socda:

_____.

Haddii aanan awoodin inaan naftayda u hadlo, isla markaana doorasho suurogal iyo caqli-gal tahay, waxan jeclaan lahaa in dhakhtarkayga koobaad noqdo: _____

_____.

Dr: _____

Haddii aan dhimanayo doorashana suurogal iyo caqli-gal tahay, waxan jeclaan lahaa in daryeelka la igu siiyo:

____ Guriga

____ Cisbitaal. Kee? _____

____ Hoy daryeel (nursing home). Kee? Xarun daryeel xanuun-biin (hospice). Kee?
_____

____ Ay bixiyaan bixiyayaal kale oo daryeel caafimaad. Waa kuwee?
_____

Rabitaankayga ku saabsan bixinta xubnaha jidhka, ama qaybaha kale ee jidhka ka dib marka aan dhinto:

____ WAAN DOONAYAA inaan bixiyo xubnahan ama qaybaha kale ee jidhka ka dib marka aan dhinto
— qaybaha loo baahdo iyo kuwa la isticmaali karo
— qaybaha soo socda kaliya: _____

____ Xad-samayn ama rabitaano gaar ah oo aan qabo _____

____ MA DOONAYO inaan bixiyo xubin jidh ama qaybo kale oo jidhka ah.

Rabitaankayga ku saabsan waxa jidhkayga ku dhici doona ka dib marka aan dhinto waa kuwan (aasid, gubid, qorshe aasid):

FARIIMO IYO FIKRADO DHEERAAD AH: _____

_____

_____.

QAYBTA III: SHARCI KA-DHIGIDDA WARQADDA

Warqadan waa inaan anigu saxeexo. Isla markaana waa inu xaqiijiyay nootaayo dadweyne (Doorashada 1) AMA ay markhaati ka ahaayeen laba qof (Doorashada 2). Waa in taariikhda lagu qoro marka la xaqiijinayo ama markhaati laga noqonayo.

Si sax ah ayaan u fikirayaa. Raali baan ka ahay wax kasta oo ku qoran warqadan, si ikhtiyaar ahna waan u sameeyay warqadan.

(Saxeexa Masuuliyad Wareejiyaha)

Taariikhda la Saxeexay: _____

Taariikhda Dhalashada: _____

Adreeska: _____

Haddii aanan saxeexi karin magacayga, waxan qof kale weydiisan karaa inu anigu warqadan ii saxeexo. _____

(Saxeexa qof aan weydiistay inu aniga warqadan ii saxeexo.)

_____

(Magaca qofka aan weydiistay inu aniga warqadan ii saxeexo oo xuruuf kala go'an ku qoran.)

_____

Doorashada 1: Nootaayo Dadweyne

Waxa hortayda taariikhda markay ahayd _____ , 20___,
ku qirtay lahaanshaha saxeexa ku qoran warqadan ama u qirtay inu yahay qofka loo amar-siiyay inu warqadan u saxeexo qofka kale. Aniga la ii ma magacaabin inaan noqdo wakiil daryeel caafimaad ama wakiil daryeel caafimaad labaad warqadan dhexdeeda.

_____
(Saxeexa Nootaahaya)

Shaambadda Halkan Hoose

Doorashada 2: Laba Markhaati

Waa in laba markhaati saxeexaan. Labada markhaati mid kaliya ayuun baa noqon kara bixiye daryeel caafimaad ama shaqaale bixiye daryeel caafimaad aniga i siinaya daryeel toos ah maalinta aan saxeexo warqadan.

Markhaatiga Koobaad:

(i)Waxa hortayda taariikhda markay ahayd _____ , 20___,

Waxan cadaynayaa in warka ku qoran (i) ilaa (iv) u run iyo sax yahay.

(Saxeexa Markhaatiga Koobaad)

Adreeska:

Markhaatiga Labaad:

(v) Waxa hortayda taariikhda markay ahayd _____, 20___,
ku qirtay lahaanshaha saxeexa ku qoran warqadan ama u qirtay inu yahay qofka loo amar-siiyay inu warqadan u saxeexo qofka kale.

(vi) Waxan jiraa ugu yaraan 18 sannadood oo cimri ah.

(vii) Aniga la ii ma magacaabin inaan noqdo wakiil daryeel caafimaad ama wakiil daryeel caafimaad labaad warqadan dhexdeeda.

(viii) Haddii aan ahay bixiye daryeel caafimaad ama shaqaale bixiye daryeel caafimaad si toos daryeel u siinaya qofka ku qoran (A), waa inaan saxeex kooban oo xuruufta hore ee magacyadayda ku qoraa sanduuqan. ❒

Waxan cadaynayaa in warka ku qoran (i) ilaa (iv) u run iyo sax yahay.

(Saxeexa Markhaatiga Labaad)

Adreeska:

XUSUUSIN

Warqadan meel amaan ah oo aad si fudud uga heli kartid la dhigo waraaqahaaga kale ee muhiimka ah. Koobiyo ama nuqulo la saxeexay sii dhakhaatiirtaada, qoyska, saxiibadaa aad isu dhawdihiin iyo wakiilka daryeelka caafimaadka, haddii aad mid magacawday. Kala sheekayso rabitaankaaga iyo arrimahaaga dadka aad jeceshahay iyo dhakhtarkaaga. U hubso in dhakhtarku u raali ka yahay inu raaco dardaarankaaga. Haddii lagu dhigo cisbitaal ama hoy daryeel, ama aad daryeel ka heshid hay'ad daryeelka guriga ku bixisa ama xarun daryeel xanuun-biin (hospice), u hubso in koobi ama nuqul warqadan ahi u ku jiro faylkaaga caafimaad. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, weydii dhakhtarkaaga, ama wac cisbitaalka aad dooratid lana hadal qaabilsanaha bukaanka, wadaad ama shaqaale bulsho.

Warqadan waxa laga soo xigtay, waxana ay si buuxda u waafaqsan tahay, xeerka Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka ee Minnesota 1998, qaybaha 145B & 145C. Waxa dib u eegay raalina ka noqday Mareegta Dhaqan-wanaagga Allina 'Allina Ethics Network' waxana doorta 'Allina Health System' si loo hormariyo qor-shaynta daryeelka iyo go'aan-gaadhista wacan. Wixii talo ah waxa la heli karaa iyadoo la waco cisbitaal ama xarun kasta oo Allina ah.

Rev 1/07

© 2007 ALLINA HEALTH SYSTEM
ALLINA ® AND THE ALLINA LOGO ARE REGISTERED TRADEMARKS OF ALLINA HEALTH SYSTEM
OTHER TRADEMARKS USED ARE OWNED BY THEIR RESPECTIVE OWNERS